

## **Soo koobida Kaalmada Dhaqaalaha Dagdagga ee Isbitaalka ku Saleysan ama Daryeelka Caafimaadka Lagama maarmaanka ah**

In ka badan qarni, hidaha caqiido ee Norton Healthcare wuxuu hagay howlgalkiisa inuu daryeelo bukaanka iyo dhaawacyada bulshadeena. Dhaxalkas iimaanku wuxuu sameyn ugeysan karaa dhinac kasta oo daryeelka ah ee aan bixinno. Isbitaalada Norton Healthcare waxay siiyaan daryeel bilaash ah ama ka dhimaan bukaanada, aan awooda ulaheyn inay bixiyaan oo u qalmaan iyagoo ku saleysan dakhliga, kheyradka iyo xaaladda qoyska. Soo koobidani waxay bixisaa aragti kooban oo ku saabsan Siyaasadeena Gargaarka Maaliyadeed ee xaaladaha degdegga ah ee ku saleysan isbitaalka ama daryeel kale oo caafimaad oo lagama maarmaanka u ah.

### **Yaa u qalma kaalmadan dhaqaale?**

Haddii aad leedahay dakhli kooban iyo/ama kheyraad, ma jiraan caymis caafimaad ama haraa ka dib caymiska caafimaadka, waxaad u qalmi kartaa xaalad degdeg ah oo bilaash ah ama qiimo dhimis ah ama daryeel caafimaad ahaan lagama maarmaanka ah oo ku saleysan shuruudaha soo socda:

1. Ma lihid caymis caafimaad ama waxaad leedahay haraa aan la bixin ka dib markii qorshaha caymisku ama la bixiyay ama la diiday cabasho sheegasho; iyo
2. Uma qalmi doontid dabolid la kaabo ama caawimaad dawladeed, sida Disproportionate Share Hospital (DSH), Children's Health Insurance Program (CHIP), Medicaid, Medicaid Management Care Organization (MCO) ama Hoosier Healthwise; iyo
3. Qoyskaaga daqligisa wuxuu u dhigmaa ama ka yar yahay 350 boqolkiiba Tilmaamaha Saboolnimada Federaalka; iyo
4. Khayraadka qaybta unugga qoyskaaga (hantida) waxay la mid yihiin ama ka yar yihiin 200 boqolkiiba tilmaamaha DSH; iyo
5. Si aad u hesho caawimaad daryeel oo caafimaad ah oo aan degdeg ahayn, waa inaad sidoo kale deganaataa Kentucky, Indiana, Tennessee, Ohio ama Illinois. Shuruuddaan degenaanshiyaha ma khusayso daryeelka degdegga ah.

Siyaasadda caawimaada ah ee Maaliyadeed waxay sidoo kale sharraxaysaa shuruudaha dheeradka ah ee u-qalmitaanka adeegyada qaarkooda.

### **Waa maxay kharashka daryeelka dartiis la iigu soo dallaci doono?**

Norton Healthcare waxay siisaa xaalad degdeg ah oo ku saleysan isbitaalka iyo daryeel kale oo caafimaad ah oo bilaash ah dhammaan bukaannada laga helo shuruudaha kaalmada maaliyadeed ee hoos yimaada siyaasaddan. Bukaannada ku haboon kaalmadaha maaliyadeed laguma soo oogi doono wax ka badan inta guud ahaan lagu ibiyo bukaanka caymiska daboolo. Tan waxaa ka mid ah daryeelka ee Norton Healthcare ee sideed isbitaal, lagu daray Norton Children's Medical Center — Brownsboro, Norton Cancer Institute, Norton Diagnostic Centers iyo Norton Cardiovascular Diagnostic Centers.

### **Sidee baan caawimo u codsadaa?**

Si aad u codsato kaalmo dhaqaale, waa inaad buuxisaa arji qoraal ah oo aad siisaa 3-dii bilood ee ugu dambaysay ee bayaannada bangiga ee mid walba hubinta iyo keydinta . Waxaad sidoo kale u baahan kartaa inaad bixiso nuqul ka mid ah canshuur celinta sanadkii lasoo dhafay ama dukumiintiyo kale, sida looga baahan yahay Siyaasadda caawimaada ah ee Maaliyadeed.

### **Sideen ku heli karaa nuqullo kamid ah siyaasada gargaarka dhaqaalaha iyo arjiga?**

Dukumeentiyada Kaalmada Dhaqaale ee Norton Healthcare iyo arjiyada waxaa laga heli karaa lacag la 'aan [www.NortonHealthcare.com/FAP](http://www.NortonHealthcare.com/FAP) iyo dhammaan xafiisyada la talinta dhaqaalaha ee isbitaalka Norton Healthcare iyo waaxaha gargaarka dagdagga. Ama waxaad wici kartaa adeegga macaamiisha (502) 479-6300 si aad u codsato in macluumaadkan laguugu soo diro lacag la 'aan.

### **Sideen wax badan uga baran karaa Siyaasada Gargaarka Dhaqaale amana ku heli karaa caawimaad ah hannaanka codsi loo sameysto?**

Si aad wax badan uga ogaato Siyaasadda Gargaarka Maaliyadeed iyo habka codsiga, la xiriir la-taliyaha maaliyadeed ee ku yaal mid ka mid ah isbitaaladayada, ama wac Adeegga Macmiilka 502-479-6300.

### **Ka waran haddii aanan ku haboonin caawimaadda hoos timaada siyaasadan?**

Haddii aadan buuxin shuruudaha u-qalmitaanka Siyaasadeena Gargaarka Maaliyadeed ee xaaladaha degdegga ah ee isbitaalka ku saleysan ama daryeel kale oo caafimaad oo loo baahan yahay, ama aad raadineyso caawimaad daryeel oo aan ahayn xaalad degdeg ah ama haddii kale daawo ahaan loo baahan yahay, waxaad weli u qalmi kartaa qiimo dhimis iyada oo loo marayo barnaamij caawimaad oo gooni ah haddii aadan caymis lahayn . Wac Adeegga Macaamiisha (502) 479-6300 si aad wax badan uga ogaato.

*Siyaasadda Kaalmada Dhaqaalaha iyo arjiyada, soo koobitaankan siyaasada, iyo dukumeentiyada kale ee la xiriira waxaa lagu heli karaa luqadaha Spanish, Serbo-Croatian, Vietnamese iyo Arabic.*